

# Waaxda Canshuuraha Minnesota lacag bay igu yeelatay. Hadda maxaan sameeyaa?

*Macluumaadka warqaddaan waxaa lagu sharaxayaa qaar ka mid ah waxyaabaha xaqa aad u leedahay inta lagu jiro lacag aruurinta.*

Waaxda Canshuuraha Minneosta waxay masuul ka tahay aruurinta canshuuraha iyo daymaha kale ee dawladda. Haddii aadan bixiin waxa lagugu yeeshay, waxaa dhici karta in aannu qaadno tallaabooyin lacag aruurina ee adiga liddi kugu ah. Sharciga ayaa ku siinaya xuquuqda qaarkood inta tallaabooyinka lagu jiro.

## Tallaabooyinka Lacag-aruurinta

Waxaannu tallaabooyinka kaa qaadi karnaa waqti kasta ee lacag lagugu yeesho, xitaa haddii aan heshiis hore kula galnay.

### Dammaanad

Sifada	Xuquuqdaada
<p>Waxaannu faragalin (sheegasho) adiga liddi kugu ah ka xarayn karnaa hantidaada guriga taasoo kaa hor istaagaysa inaad iska iibisid, wareejisid, ama aad cusboonaysid rahanta. Dammaanadda waxaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Diiwaangelinaya Xoghayaha Gobolka iyo/ama degmada.</li> <li>• Waxaana laga heli doona diiwaanka amaah qaadashada ugu yaraan illaa 7 sanadood.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Haddii ay kula tahay in dammaanadda si qalada loo buuxiyay, waxaad codsan kartaa “xafiisku inuu dib u eego.”</li> <li>• Haddii waaxdu aysan faraha kala bixin dammaanadda muddo 30 cihso kaddib marka deynta oo dhan la bixiyay, waad na dacwayn kartaa.</li> </ul>

### Dheellitirka

Sifada	Xuquuqdaada
<p>Waxaa dhici karta inannu kaa qaadano (dheellitir) deymaha dawladeed qaarkood si aad ku bixisid daynta laguug leeyaha, sida:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Lacagaha iibiyaha ama qandaraasyada</li> <li>• Lacag-celinta dakhliga canshuurta ama Kireystaha</li> <li>• Lacag-celinta ama lacagaha federaalka</li> <li>• Lacag-clienta canshuurta Wisconsin</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Kaama qaadi karno dakhliga kaa soo gala Sooshal Sekuurtika, nacfiga askarta, ama nacfiyada hawlgabka shaqaalaha tareennada.</li> <li>• Waa inaannu kugu soo warglinno muddo 60 cisho horteed ah inta annu bilaabin qaadashada lacag kasta ee dawladda federaalka ah.</li> <li>• Haddii aad hayso caddayn ah in deynta waqtigeedii aan la dhaafin ama aan sharci ahaan lagaa qaadi karin,, waxaa aad codsan kartaa dib-u-eegis.</li> </ul>

## Tallaabooyinka Ururinta Qasabka ah

Haddii aadan nala soo xariirin waqtiga la iska rabay ee qaansheegtada ku qoran ama warqadda ah “amarka ah in la bixiyo” ee lagu soo diray, waxaannu kaa qaadi karnaa tallaabooyin adag oo dheeraad ah si aannu ku soo aruurinno deyntaada. Waxaannu kuwaan ku sheegnay “tallaabooyinka aruurinta adag.” Noocyada tallaabooyinka hoos ayay ku yaallaan.

### Canshuur ganaaxa

Sifada	Xuquuqdaada
Waxaannu lacag ka qaadan karnaa akaawnnadaada bangiga, mushaaroooyinkaada, ama dakhliyada kale.	Waxaad na weydiisan kartaa inaannu yareyno ama joojinno canshuurta ganaaxa ah sababo la xariira dhaqaalo xumo. (“Bogga xiga ka eeg “Sida aannu ku joojin karno tallaabooyinka aruurinta?”)

### Kala -noqoshada Shatiga iyo Shahaadada

Sifada	Xuquuqdaada
Waxaannu kaala noqn karnaa karnaa (ka-celin) ama ka horistaagi karnaa cusboonayntaada: <ul style="list-style-type: none"><li>• Shatiga ganacsiga</li><li>• Shatigaaga xirfadeed</li><li>• Shahaadada canshuurta iibka</li></ul>	<ul style="list-style-type: none"><li>• Waa inaannu ku ogaysiino 30 cisho ka hor inta aysan kula soo xariirn mamuulka shatiyayntu.</li><li>• Waxaad codsan kartaa dhegaysi aad ku joojinayso kala-noqoshada muddo 30 cisho gudahood ah ee xiga ogaysiiska aannu kuu so dirnay.</li></ul>

### La Wareegidda

Sifada	Xuquuqdaada
Waxaa dhici karta inaannu la wareegno (“la wareegid”) hantidaada oo aannu iibinno si aannu ku bixinno dayntaada.	Waxaad codsan kartaa inaannu hantidaada ku iibinno muddo 60 cisho gudahooda.

### Daymaha Ganacsiga Lagu Yeesho

Sifada	Xuquuqdaada
<ul style="list-style-type: none"><li>• Haddii aad sarkaal tahay ama qofka masuulka ka ah xaraynta canshuurtaada ama aad canshuur ka bixiso ganacsi, waxaad si toosa ah masuul uga tahay deymaha canshuuraha aan la bixin.</li><li>• Haddii aad gancsi iibsato, waxaad masuul ka noqonaysaa canshuuraha aan la bixin. Haddii aad nala soo xariirtid ugu yaraan 20 cisho ka horreeya iibsashda kama dambaysta ah, waxaannu kuu sheegi karna haddii ganacsiga canshuur lagu leeyahay.</li></ul>	Haddii aannu ku qiimayno inaad masuul ka tahay deynta adigu oo aad qabto inuu qalad jiro, waxaad waaxda weydiisan kartaa inuu maamulku dib u eego.

## Naadada Khamriga

Sifada	Xuquuqdaada
<ul style="list-style-type: none"><li>Waxaannu ganacsigaaga ku naadinaynaa shabakaddenna liistada canshuur-bixin la daahidda haddii aad ka hasysato shatiga khamriga iyo in ka badan 10 cisho aad xaraynta la daahday ama bixinta canshuur ganacsi ee kasta.</li><li>Inta ganacsigaagu uu ku jiro liistada, ma jiro jumlayste, ama warshad khamri oo kaa iibin karta ama kuu soo qaadi karta adiga badeeca kasta.</li></ul>	Waa inaannu ugu yaraan muddo 10 cisho ah kugu ogaysiinno ka hor inta ganacsigaaga galin naadada liistada khamriga.

### Sideebaan u joojin karaa tallaabooyinka aruurinta?

Waxaannu joojin doonnaa aruurinta oo idil marka deyntaada si buuxdo lagu bixiyo. Nagala soo xariir 651-556-3003, 1-800-657-3909 (telefoonka lacag-laanta) ama [mdor.collection@state.mn.us](mailto:mdor.collection@state.mn.us) si aad ku bixiso lacagta.

### Doorashada Bixinta Lacagta

- Si eletronig ah ayaa akaawnaaga bangiga lagala baxayaa.** Gal [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) iyo ku qor **doorashada lacag bixinta (payment options)** santuuqa “Search” ama wac 1-800-570-3329. Wax lacag kuguma soo dallacayno marka aad adeegaan isticmaalayso.
- Kaarka deymaha ama kaarka akaawnaaga ku bixi lacagta.** Gal <https://paytax.at/mn> ama wac 1-855-947-2966. Nidaamka Tayada Lacagta (Value Payment Systems) lagu socodsiiyayo lacag bixinnadaan iyo ujradyo lagu soo dallacayo adeegaan.
- Lacagta ku bixi jeeg ama jeegga wareega.** Gal [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) iyo ku qor **lacg bixin jeeg ah** santuuqa “Search”. Raac tilmaaha ku jira “e-Services Payment Voucher System”.

### Heshiisyada Lacag-bixinta

Haddii aadan deyntaada si buuxka isaga bixin karin, waxaad naga soo wici kartaa 651-556-3003 ama 1-800-657-3909 (telefoonka lacag-laanta) si aad ku codsatid heshiiska lacag bixinta.

Heshiishka lacag bixinta oo ay ku jirto daynta canshuurta waa shardi in lagu bixiyo ujrada \$50 doollar oo dheeraad ah oo aan dib loo soo celinayn.

### Dhaqaalo Xumo

Haddii aadan awoodin in aan nala gasho heshiiska lacag bixinta ama ujrada \$50 waxaa aad codsi ku sheegan karta dhaqaalo xumo. Dhaqaalo Xumo “Financial Hardship” macnaheeda waa inaadan awoodin waxyaabaha aasaasiga ee adiga iyo qoyskaagu uu ku noolaado. Tusaale waxaa ka mid noqon kara awood xumida:

- Cunta Siin
- Hooy ku filan
- Bixinta kharshka, sida biyaha, korantada iyo telefoonka
- Iibsigu daawooyinka lagu soo qoro
- Xaalado culus ee daawaynta nafsad ahaantaada ama xubin kugu dhaw ee qoyska

## **Xuquuqdaada ka canshuur-bixiye Ahaan**

Haddii aanu nahay Waaxda Canshuuraha ee Minneapolis, waxaanu isku xilsaaraynaa in taageerno xuquuqdaada ka canshuur-bixiye. Wixii macluumaad dheeraada, gal [[www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us)] iyo riix on Taxpayer Rights boogga xaggiisa dambe, ama la xariir Taxpayer Rights Advocate.

Waxaa kale oo aad xaq u leedahay:

- In aad heshid ogaysiiska canshuurta iyo biilasha sharraxaya canshuur laguugu leeyahay, ganaaxyada, iyo dulsaarka- iyo sababta.
- In aad ogaato sababta aan kuu weydiinayno macluumaadka iyo waxa dhici doona haddii aadan nasiin macluumaadka.
- In aad dhaqso u heshid, si xushmad leh, iyo su'aalahaaga oo si saxan looga jawaabo.
- In aad filato in aan la kashifiyn macluumaadka aad na siisay, marka laga reebo arrimaha sharcigu oggolyahay keliya.
- Uqalanto in aad yeelato xisaabiye, garyaqaan, ama qof kale oo qaangaar kaa wakiil noqda waqti kasta.
- In la duubo wareysiga adiga ay kula yeelatay waaxda shaqaalaha haddii aad horey noo soo wargalisay.
- In aad iibsato koobigaa lagaa duubay haddii annagu aan wareysiga adiga kaa duubnay adiguna aadan duuban.
- In aad nagu dacweyso maxkamadda haddii aad rumaysantahay in waxyeellada kaa soo gaaray mid ka mida waaxda shaqaalaha si taxadder la'aana ama si ulakaca iska indhatiray sharciga markii canshuurta laguugu yeeshay la uruurinayay. Si kastaba, haddii maxkamaddu ay ogaato in dacwaddu tahay mid aan macno weyn lahayn, ama loola jeeday mid wax lagu seetadheeraynayo, maxkamaddu waa ku ganaaxaysaa.

## **Waxaa kala xariiri kartaa U-doodaha Xuquuqda Canshuur-bixiyaha**

Inkasto aanu ku dadaalno inaan xallinno murannada nagala dhaxeeya canshuur-bixiyayaasha, haddana markasta ma awoodno. Markaaso kale, waxa aad la soo xariiri kartaa Taxpayer Rights Advocate wac 651-556-6013, 1-855-452-0767 (telefoonka lacag-laanta), ama [dor.tra@state.mn.us](mailto:dor.tra@state.mn.us).